# Jadeecada Rubella

## Waa maxay jadeecada rubella??

Jadeecada Rubella, sidoo kale waxaa loogu yeeraa Jadeecada Jarmalka, waa jiro nabro ah ee uu sababo faayruska.

## Waa maxay aastaamaha jadeecada rubella?

Aastaamaha jadeecada rubella waxaa ku jiro:

- nabro
- qandho heer hooseeyo
- qufac
- bararka qanjirada ka dambeeyo dhagaha iyo qoorta

Nabraha guud ahaan waxay u muuqdaan midka koowaad wajiga oo ka dhaqaaqaa madaxa illaa cagta, soconayo qiyaastii 3 maalmood. Aastaamaha jaddeecada Rubella waxaa ku jira kara xubno xanuunka, gaar ahaan kuwa ka mid ah hablaha weyn. Illaa kala bar dadka oo dhan ee ku dhacay jadeecada rubella ma lahan aastaamo.

## Yuu ku dhacaa jadeecada rubella?

Qof walba ee aan laga tallaalin ama uusan ku dhacin jadeecada rubella wuu ku dhici karaa cudurka. Sababtoo ah waxaa jiro dadka aduunkoo dhan iyo Mareykanka ee aan la tallaalin, waxaa suurtogal ah in safrayaasha qaadsan waxay qaadsiin karaan jadeecada rubella dadka aan tallaalneyn.

## Dhibaatooyinkee caafimaad ayaa sababa jadeecada rubella??

Carruurta caafimaadan inta badan iyo ragga weyn way ka soo kabsadaan jadeecada rubella iyadoon dhibaato jirin. Dadka weyn qaarkood ee qaba jadeecada rubella, gaar ahaan haweenka, waxaa ku dhaca xubno xanuunka ama xubno bararka.

Haddii naag uur ah ee aanan iska difaaci karin jadeecada rubella wuxuu ku dhacay ka hor isbuuca 21aad ee uurka, canuga waxa ku dhici karo caabuqa faayruska jadeecada (CRS), taas oo sababi karto dhibaatooyin caafimaad halis ah, oo ay ku jiraan ilmaha dilmo, kasoo dhaca, dhalmada degdega, dhagoolnimada, dhinnaanta maskaxda, isbadelada lafaha, iyo waxyeelada beerka iyo beer yaraha.

Qaar ka mid ah dhibaatooyinkaan waxaa lagu ogaadaa dhalashada ama gudaha 2-da sanno ugu horeyso ee nolosha. Dadka kale, sida sonkorta, waxay dhici kartaa carruurnimada dambe. CRS way ku yartahay Mareykanka sabab la xiriirto isticmaalka caadiga ah ee tallaalka rubella.

## Sidee loo ogaadaa jadeecada rubella?

Sababtoo ah jadeecada rubella waxay u egtahay sida jirooyin nabraha kale, waxaa kaliya oo lagu ogaan karaa baaritaanka sheybaarka. Daryeel bixiyayaasha waxay ka qaadi karaan muunooyinka dhuunta, kaadida ama dhiiga si loo baaro faayruska.

## Miyuu jiraan tallaalka jadeecada rubella?

Haa. Tallaalka jadeecada rubella wauxuu wataa tallaalka MMR (Jadeecada, qaamo bararka, Jadeecada Rubella).

## Sidee ayay jadeecada rubella u faaftaa?

Jadeecada rubella waxaa lagu faafin karaa markii qof qaba jadeecada rubella uu ku qufaco ama ku hindhiso dhinacaaga, ama haddii aad taabatid dhacaanada ka imaanaya afka ama sanka qofka qaba jadeecada rubella oo kadid taabto indhacaaga, sankaaga, ama afkaaga.

Mudada u dhaxeyso gaarista faayruska iyo bilowga jirada inta badan 14 maalmood, laakin waxay iska badeli kartaa ka bilow 12 illaa 23 maalmood. Qofka qaba jadeecada rubella wuxuu u faafin karaa dadka kale ka bilow 7 maalmood ka hor illaa 7 maalmood kadib markuu nabraha muuqdo.

## Maxaa la sameyn karaa si looga hortago jadeecada rubella?

Tallaalka waa wadada ugu wanaagsan ee looga hortago jadeecada rubella. Tallaalka baahsan ee la dagaalamo jadeecada rubella way ku adagtahay xakameynta baahsanaanta cudurka iyo ka hortagida ciladaha dhalashada ee uu sababay CRS.

## Miyay jiraan daaweyn jadeecada rubella ah?

Ma jiraan wax daaweynta jadeecada rubella. Daryeel bixiyaha caafimaadkaaga waxaa usuurtogali karto inuu ku caawiyo daaweynta qaar ka mid ah aastaamaha.

Minnesota Department of Health
PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
www.health.state.mn.us/immunize

06/01/2016 (Somali)
*Si aad ugu heshid warbixintaan qaab kale duwan, soo wac: 651-201-5414.*